

Iska talaal hargabka ama duriga (influensa)

Information på somaliska

Wey fududahay in la isku daarto ama la is qaadsiyo

Wey fududahay in la isku daarto ama qaadsiyo hargabka/duriga (influensa) Feyruuska (viruset) waxaa la iskugu gudbin karaa qufaca, hindhisada, iyo xidhiidh dhow oo lala sameeyo qofka qaba hargabka/duriga (influensa). Calaamadaha lagu garto inta badan waa qufac, qandho ama xumad aad u sareysa iyo madax xanuun, murqo xanuun iyo xubno xanuun. Inta badan waxaa uu qofka hayaa qiyaastii hal todobaad, laakiin waxaa la dareemi karaa daal ilaa dhoowr todobaad oo kale. Dadka intooda badan hargabku/ durigu (influensa) waxa khatar ah kuma aha. Halka dadka qaarkood ay aad ugu xanuunsadaan isla markaana mararka qaarkoodna uu sababo xaadal dhimasho ku dhow, tusaale ahaan waxaa uu qofka ku noqdaa boronkiito/jeeni wareen iyo dhiiga oo sumooba (lunginflammation och blodförgiftning).

Khatarta ah in aad u xanuunsato ama jirato aad bey sareysaa waxaa sidaa darteed haboon in aad is talaasho haddii

- Aad jirto 65 sano ama aad ka weyntahay
- Aad uur leedahay
- Dadka waawen iyo caruurta da'doodu ka weyntahay 6 bilood ee qaba cudradan ama ku jira marxaladahan hoos hoos ku xusan:
 - Cudurada wadnaha oo joogtada ah ama aan laga bogsan (kronisk)
 - Cudurada sambabada oo joogtada ah ama aan laga bogsan (kronisk), cudurada sambabada ku dhaca (lungsjukdom), cudur ku dhaca sida tusaale ahaan sambabada qaybta a neef mareenka (kronisk obstruktiv lungsjukdom) oo loo soo gaabiyo (KOL) iyo cudurka neefta aadka u daran (svår astma)
 - maraxaladaha kale ee keeni kara hoos dhac ku yimaada shaqada sambabka ama awooda qufaca oo licifa, waxaa marxaladahaas tusaale ahaan ka mid ah cayil xad-dhaaf, cudurada ku dhaca murqaha kalyaha (neuromuskulära sjukdomar) iyo naafanimada xubno badan oo jidhka ka mid ah (flerfunktionshinder)
 - hoos dhaca shaqada beerka ama kalyaha ee joogtada ah ama aan laga bogsan (kronisk leversvikt eller njursvikt)
 - macaanka (diabetes)
 - maraxad ay macnaheedu tahay hoos dhac aad ah oo ku yimaada xubnaha difaaca jidhka oo uu sababey cuduro ama daawooyin

Macluumaaad ku saabsan talaalka iyo is talaalida

Qoka iska talaala hargabka/duriga (influenta) waxaa uu helayaa difaac wanaagsan oo ka difaaca cudurka. Haddii lacala xitaa ay dhacdo in uu xanuunsado calaamadaha xanuunku waxaa ay noqonayaan kuwo fudud. Talaalka sanad walba waa la badalaa ama la waafijiya si uu uga adkaado fayruuska sababa hargabka/duriga ee xiliga (säsongens influensavirus). Dadka ku nool dunida dacaladeeda oo dhan ayaa lagu talaaleey talaalka noocan oo kale ah wixii ka danbeeyey 1970-yadii. Talaalka ka dib waxa dhici karta in gacanta meeshii lagaa talaaleey ay ku bararto kuna damqato. Dadka qaar ka mid ah waxaa qabata xumada ama qandho yar, laakiin dhibkaas waxaa lagaga bogsadaa dhawr maalmood gudahood. Waxyeelooyika aad khatarta ah waa kuwo sida badan aan aad caadi u ahayn.

Goorma iyo goobtee ayaad iska talaali kartaa?

Waxaa aad iska talaali kartaa rugta daryeelka caafimaadka ee xafadaada laga bilaabo 7-ka bisha noofambar (november) 2017-ka. Haddii aad ka tirsan tahay mid ka mid ah kooxaha kor ku xusan, waxa aad bixinaysaa 60 karoон.

Fadlan la hadal rugta caafimaadka xaafadaada ama qaybta qaabiliaada haddii aad rabto in aad ogaato macluumaaad dheeri ah ama aad rabto in aad is talaasho. Waxaa sidoo kale aad ka akhrin kartaa macluumaaad dheeri www.1177.se.